# Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #24

*Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka*

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

**OAR 333-150-0000, CUTUBKA 5-203.11**

(A) Marka laga reebo sida ku cad ¶¶ (B), (C), (D) iyo (E) ee qaybtaan, ugu yaraan 1 qasabad oo gacmaha lagu dhaqdo ama tiro qasabado ah oo gacmaha lagu dhaqdo ee muhiim u ah isticmaalka ku wanaagsan shaqaalaha ee goobaha ku cad § 5-204.11, ayaa la iska rabaa in la keeno.

(D) Qaybaha cuntada ee guurguura:

(1) Qaybaha cuntada ee guurguurta ee class II, III iyo IV waa in ay keenaan qasabad gacmaha lagu dhaqdo;

(2) Iyada oo ay jirto faqrad hoosaadka (1) ee faqradaan, qaybaha cuntada ee Class II iyo III ee shatiga la siiyay kahor Sebteembar 4, 2012 ayaa laga rabaa in ay keenaan hanaan gacma dhaqasho sida ku cad ¶ (C) ee qaybtaan haddii ugu danbayn Janaayo 1, 2018 qaybta sare loo qaaday si ay u buuxiso shuruudaha faqradda (D) (1). Waxaa khasab ah in ay ugu yaraan jiraan biyo mug ahaan shan galaan gaaraya marka hore kuwaas oo u diyaarsan gacmadhaqashada bilowga maalinka shaqada.

**SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:**

Gacmadhaqashadu waa mid kamid ah waxyaabaha ugu muhiimsan habraacyada caafimaadka bulshada ee goobta cuntada. Haddii goobaha cadaadiska biyaha ee ku filan leh aysan jirin, waxay adkaynaysaa in shaqaalaha cuntada qaybta guurguurta ay gamaha u dhaqdaan sida ku filnayd ee looga baahnaa.

## Hanaanada Gacmadhaqashada Qaybta Guurguurta ee Cadaadiska loo Isticmaalo

Sharciga Fayadhowrka Cuntadu wuxuu qaybaha cuntada ee guurguura ka doonayaa in ay sare u qaadaan hanaanadooda gacmadhaqashada si ay u noqoto mid muhiim u ah qaybta cadaadisna loo saaro kama danbays Janaayo 1, 2018. Ku shaqeeye yaashu waa inay bixiyaan cadaadis iyo heerkul ma doorsoome ah (100°F ama kasiii sareeya) markasta si lamid ah sida aad ku arki lahayd maqaaxida shatiga haysata.

**Shuruuddaan gudaheeda, hanaanada noocaan ah lama ogola:**

- Goobaha kumeelgaarka ah ee leh sakeelka 5ta galaan ee biyaha ah leh
- Hanaanka loo diyaariyaya ayada oo la adeegsanayo kaliya cuf isjiidad
- Weelasha kaadi-haysta u eg ee biyaha nadiifka ah loogu tala galay
- Qaybaha gacmadhaqashada aan ganacsiga ahayn, sida kuwa ay suuqgeeyaan shirkadaha dalxiisku
- Hanaanka ku bamgareynta cagta




**Hanaanka gacmadhaqashada la aqbali karo waxaa kamid ah:**

- Haanta biyaha nadiifka ah ee 5ta galaan ee muhiimka ah iyo haanta balaaran ee haynaysa biyaha waskhda ah taasoo 15% ka balaaran tan kale
- Bam cadaadiska keenaya
- Kululeeyaha biyaha kulul si uu si joogto ah biyaha u siiyo heerkul gaaraya 100°F ama kasii badan

Waxaa jira dhowr qasabado gacmadhaqashada ah oo ay ansixisay Mu'asasada Fayadhowrka Qaranka (NSF) iyo sidaa si lamid ah qaybaha gacmadhaqashada ganacsiga ah ee VR kuwaas oo leh biyo kulayliyeyaal ay kujiraan kuwo la dhisi karo.

Ku shaqeeyeyaasha qaybaha waxay wali gacanta ku qaadi karaan ilaa 20 galaan oo biyaha la isticmaalay ah sida sharcigu u ogolyahay. Haddii haamuhu intaan ka weynyihiin, waa in lagu qubaa meel qashin oo ganacsi ama qandaraas lala galo adeeg ganacsi oo tuura. Dhammaan haamuhu waa in ay muhiim u noqdaan qaybta.

Qaybaha soo kordhinaya haamaha biyaha nadiifka ah leh waxay u baahan karaan in ay ku soo darsadaan baaxadda qaadista biyaha la isticmaalay oo dheeraad ah sidoo kale.

**Fadlan la xiriir hay'adda caafimaadka bulshada ee deegaankaaga kahor inta aadan iibsan qalab cusub ama haamo si aad u xaqiijiso in ay buuxinayaan shuruudaha Sharciga Fayadhowrka Cuntada.**

**Sharciga Qabanaya, OAR 333-150-0000**

**5-202.12 Goobta Gacmadhaqashada, Rakibaadda.**
Qasabadda gacmadhaqashada waa in la qalabeeyo si ay u keento biyo heerkulkoodu gaarayo ugu yaraan 38°C (100°F) ayada oo la adeegsanayo dhuun ama tuubo isku qasaysa. [Pf]
(B) Dhuunta uumiga isku qasta looma isticmaali karo qasabadda gacmadhaqashada.
(C) Tuumbada is xiraysa, tartiib u xirmaysa, ama cabirada leh waa in ay keentaa socodka biyaha ugu yaraan 15 ilbiriqsi ayada oo aan u baahnayn in dib looga shaqaysiiyo tuumbada.

**5-205.11 Isticmaalka Goobta Gacmadhaqashada.**
(A) Goobta gacmadhaqashada waa in la ilaaliyaa si markasta shaqaaluhu u helo una isticmaalo. [Pf]
(B) Goobta gacmadhaqashada waa in aan loo isticmaalin ujeeddo aan ahayn gacmadhaqasho. [Pf]

**5-305.11 Shuruudaha Hanaanka Biyaha.**
(A) Qaybta cuntada wareegta ee Class IV waa in ay lahaataa hanaan biyo oo guurguura oo cadaadis isticmaala. Hanaanku waa in uu baaxad ahaan ku filnaadaa si uu biyo kuluul oo ku filan u siiyo iyo kuwo qabowba diyaarinta cuntada, dhaqidda alaabta, iyo gacmadhaqashada, iyo shuruudaha shuruucdaan. Adeeggaan waa in uu ka koobnaadaa ugu yaraan shan galaan oo biyo ah si gacmaha loogu dhaqo iyo 30 galaan ama laban laab qasabadda saddexda qaybood leh, hadba kii weyn, oo biyo ah oo dhaqista alaabta ah. [P]
(B) Qaybaha cuntada guurguurta ee Class II iyo III waa in ay leeyihiin hanaan biyo oo bixiya biyo ku filan oo loogu tala galay diyaarinta cuntada, gacma dhaqashada, alaab dhaqista ama shuruudaha kale sida ku cad shuruucdaan. Haddii alaab dhiqista laga sameeyo qaybta, ugu yaraan 30 galaan ama laban laab baaxadda qasabadda saddexda qaybood leh, hadba kii weyn, oo biyo ah ayay tahay in loo huro ujeedadadaan. Ugu yaraan shan galaan oo biyo ah ayaa loo baahan yahay in la siiyo gacmadhaqashada. [P]
(C) Marka laga reebo waxyaabaha la xiriira gacmadhaqashada sida ku cad faqrad hoosaadka 5-203.11(D)(2), dhammaan qaybaha cuntada guurguura waa in loo diyaariyaa haamaha biyaha la isticmaalay ee la qaadi karo ee muhiimka ah isla goobta. Qaybta guurguuraysa waxay isku xiri kartaa biyaha iyo bulaacadda hadii laga heli karo goobta ay ka shaqaynayso, si kastaba ha ahaatee, haamahu waa in ay yaalaan qaybta markasta. [Pf]

**5-401.11 Baaxadda iyo Bulaacadda.**
Haanta bulaacadda haynaysa ee goobta cuntada ee guurguurta waa in ay ahaataa:
(A) Baaxad ahaan 15 boqolkiiba mid ka weyn baaxadda haanta biyaha; iyo
(B) Janjeerto si ay u daadiso taasoo ah 25 mm (1 inji) dhumucda hoose ama kasii sareysa, oo ku qalabaysan gacanta xiritaanka.

**5-103.12 Cadaadiska.**
Biyaha cadaadiska isticmaalaya waa in la siiyaa dhammaan waxyaabaha loo baahan yahay, qalabka, iyo qalabka aan cuntada ahayn ee loo baahan yahay  si biyaha loo isticmaalo. [P]